



Gobalku wuxuu heer gabogabo ah marsiinayaan meel marinta maalgalin dhan \$2 billion oo lagu bixinaayo dugsiyada dawlada

Baarlamaanka Oregon ayaa gabogabo marsiinaaya go'aaminta maalin dhan \$2 billion oo lagu bixinayo hanaanka waxbarashada gobalka ee fasalada preK-12.

Asbuucii lasoo dhaafay, Aqalka Wakiilada ee Oregon ayaa ansixiyay [Xeerka Golaha horyaalay ee 3427](#), kaasoo canshuur cusub kusoo orgaaya ganacsiyada, ayadoo uu lasocdo hoos udhigid lagu sameeyay canshuurta dhaqaalaha shaqsiga ah ee inta badan Ururada. Xeerk, hadii la ansixiyo, waxaa lafilayaa inuu soo xareeyo \$2 billion oo dakhli cusub ah labadii sanaba, kaasoo %1 billion oo kamid ah loo qoondayn doono Haayad Khayri Ah oo Dugsiyada Diirada saaraysa taasoo si toos ah loogu qaybin doono dugsiyada.

Degmooyinku waxay ikhtiyaar uheli doonaan inay lacagta haayadu siiso u adeegsan qaab ay kubuuxiyaan baahiyaha ugu muhiimsan ee ardaydooda ayagoo kubixinaaya lacagta afar dhinac oo muhiim ah: badqabka iyo caafimaadka dareen-bulsho ee ardayga, fursadaha waxbarasho ee nidaamsan sida hormarinta dookhyada maadooyinka, yaraynta tirada ardayda ee iskufasalka kujira, iyo kordhintaa waqtiga wax barashada. Qiyaasaad hore ayaa muujinaaya in Portland Public Schools ay kaheli doonto lacag kudhaw \$80 million dakhliga labadii sanaba.

“Dugsiyada dawlada waxaa haysta maalyad yari aad ubaahsan oo muddo jirta, waxaana kurajo waynahay in Baarlamaanka Oregon ay talaabo sax ah qaadi doonaan,” ayuu yiri Guadalupe Guerrero, Maamulaha Guud ee Portland Public Schools. “Codayntu waxay hal talaabo noo dhawaynaysaa xaqiijinta hanaan waxbarashada dadwaynaha ah oo tayo leh oo kakooban fasalada preK-12 taasoo degmooyinka kataageeraysa dhaqan galinta xeeladaha muhiimka ah, ayna kujiraan balaarinta fursadaha waxbarashada dhalaanka, taageerooyinka habdhaqanka ardayga oo la kordhiyay, kordhintaa iskudheeli tirka cabirka ardayda iyo dadka waawayn, casharada waxbarashada farshaxanka oo laxoojiyay, iyo meelah kale ee muhiimka ah kuwaasoo yarayn doona dulduleedada adag ee kajira maalgalinta guusha ardayga.”

Lacagta soo harta waxaa lagu dhiibayaan maalgalinada waxbarashada dhalaanka; balaarinta helitaanka cuntooyinka dugsiga; Cabirka maalgalinta buuxda 98 (waa cabir codayn oo soo baxay 2016 kaasoo lacag uqondynaaya kor uqaadista tirada ardayda dugsiga sare kaqalin jabinaysa); kordhintaa maalgalinta Haayada Naafada ee Qarashka Badan; iyo Caawimaada Ilmaha Yaryar ee sida buuxda loo maalgaliyo/Waxbarashada Gaarka ah ee Caruurta yaryar.

Aqalka wakiiladu wuxuu ansixiyay sharciga bishii May 1, halka aqalka sanadka lafilaayo inuu ucodedeyo asbuucaan. Hadii la ansixiyo, waxaa loo gaynayaa Gudoomiyaha Gobalka. si ay usaxiixdo.

Txeerka ayaa kadhashay shaqo ay wadajir uqabteen Gudigga Iskudhafka ee Baarlamaanka uqaabilsan Guusha Ardayda, kaasoo la aasaasay janaayo 2018 si ay qorshe ugu sameeyaan kor uqaadista natiijooyinka ardayda. Gudigga ayaa kulmay intii lagu jiray kaafadhigii 2018 kadibna diyaarshay hanaan uu kuleelaha iyo dayrta kula kulmaayo ardayda, macalimiinta, maamulayaasha, shaqaalaha dugsiga, xubnaha gudigga dugsiga, waalidiinta, hogaaamiyaasha ganacsiga, iyo qolyaha kale ee danaynaaya. Kormeerka waxaa kujiray munaasabad laqabtay [Sibteembar. 27 laguna qabtay Dugsiga Sare ee Madison.](#)